

# Right Now Needs Fund (Barnaamijka Hadda Ubaahan Maalgelinta)

Taageeridda ardayda Seattle +  
qoysaska ka baxsan fasalka.

Dallada Waxbarashada ee Right Now Needs Fund (Barnaamijka Hadda Ubaahan Maalgelinta) waa barnaamij nooc lamid ah aanu jirin oo ka shaqeeya heer dugsiyeedka gaarka ah si uu wax uga qabto baahiyaha aasaasiga ah ee ardayda iyo qoysaska guud ahaan Dugsiyada Dadweynaha Seattle oo dhan. Maalgelintu waxa ay xaqiijisaa in ardayda ay si buuxda uga qeybqaataan waxqabadyada fasalka iyadoo ay daboolayso kharashaadka dharka diiran, cuntada iyo hoyga ee aan kamidka ahayn miisaaniyad dugsiyeedka gaarka ah, laakiin lagama maarmaanka u ah ardaydu inay ku kobcaan. Laga soo bilaabo aasaaskii sanadki 2018 illaa sannad dugsiyeedka 2022-23, **maalgelintu waxa ay bixisay 69,206 xaaladood oo taageero ah.**

## Maxaa la daboolaa?



DHAR LA XIRTO



KIRADA



CUNTADA



SAHAYDA DUGSIGA



ADEEGYADA GURYAHA



BAAHYAHA KALE

🌐 Luqadaha kale ka akhri  
[alliance4ed.org/translation](https://alliance4ed.org/translation).



## Sidee buu u shaqeeyaa barnaamijka?

Arday kasta oo qaba baahiyo aasaasi ah oo aan la daboolin ayaa codsan kara ama waxaa gudbin kara xubnaha bulshada katirsan iyo shaqaalaha dugsiya. Dhammaan codsiyada iyo gudbinnada waa in loo gudbiyaa maamule dugsi, shaqaale qaabilsan taageerada qoyska, lataliye dugsi ama shaqaale bulsho oo ku sugan Dugsiyada Dadweynaha Seattle.

→ La xiriir maamulahaaga, shaqaalaha qaabilsan taageerada qoyskaaga, lataliyaha dugsiyaaga ama shaqaalahaaga bulshada si aad maantaba taageero u hesho.

 ALLIANCE  
for EDUCATION

 Seattle Public  
Schools

